



## WELWELKA OO LAGA WADA HADLO

Kani waa tilmaame ama hagaha waalidka ee sidii aad ula dhaqmi lahayd ilmahaaga marka uu muujiyo nacayb iyo fikrado xagjir ah



## **WELWELKA OO LAGA WADA HADLO (FRÅN ORO TILL SAMTAL)**

**Kani waa tilmaame ama hagaha waalidka ee sidii aad ula dhaqmi lahayd ilmahaaga marka uu muujiyo nacayb iyo fikrado xagjir ah**

Hagahan waxaan ugu talagalnay waalidiinta ama ruux xidhiidh ehelnimo laleh carruurta iyo dhalinyarada. Ha ahaato inaad xambaarsantahay welwel ama welwelkaagu uu mid dhab ah yahay.

Ururka Rádda Barnen wuxuu sanado badan la kulmay waalidiin ay carruurtoodu muujiyeen nacayb iyo fikrado xagjir ah. Ururku waxaa uu arkay sida ay muhiim u yihiin waalidka iyo ehelka si loo joojiyo sii xogaysiga ay ilmaha iyo dhalinyaradu u qaadanayaan fikrado xagjir ah. Waxuu sidoo kale ururku la kulmaa waalidiin badan oo dareemaya kalinimo iyo welwel ku saabsan carruurtooda.

Qaar ka mid ah waalidiinta waxay ku adkaan karta inay fahmaan waxa ay sameeyn lahaayeen marka ay welwelaan. “Welwelkaygu ma macquul baa?” “miyaan buunbuuninayaa?” Waxaan mar walba ku dhiirrigelinaa waalidiinta inay si dhab/halis ah u qaataan welwelkooda, inay bilaabaan inay su’aalo weydiiyaan ilmahooda, isla markaana ay ka raadsadaan caawimo dad kale oo waaweyn si ay u helaan fahan wanaagsan oo ku saabsan xaalada. Haddii welwelku xaqiiqo noqdo, badanaa waxaa imanaya dareen ah ceeb, dambi iyo awood la’aan, waxaana imaan kara isweyddinta su,aalo ah “Sidee tani ku dhacday?” “Qoyskeenna kama jirto fikrado sidan oo kale ah oo ku saabsan dadka kale!”

Dareennadan waa kuwo caadi ah, balse aad bay u culus yihiin in qof keligiis xambaaro.

Adigu door muhiim ah ayaad ku leedahay nolosha ilmahaaga. Adiga ayaa ilmahaaga si fiican u yaqaano, La joogitaankaaga iyo daryeelkaaguna aad bay muhiim u yihiin ilmahaaga. Cilmi-baaristu waxay sidoo kale sheegaysaa in taageerada waalidka iyo ehelka ay door weyn ka qaadato kalsoonida/badbaadada iyo horumarka/korriinka carruurta.

Qoraalkan aan halkan kula wadaagayno, waxaan rabnaa inaan ku siino taageero iyo dhiiragelin si aad ugu dhiirato inaad la hadasho ilmahaaga, aadna raadsato caawimo marka loo baahdo, isla markaana aad xoojiso xiriirka aad la leedahay ilmahaaga.

## IS DARYEEL KA WAALID AHAAN

Waxaa dhici karta inaad dareento wanaag culeys marka waalid ahaan aad isku dayayso inaad taageerto ilmahaaga. Xaalad kastana waa mid gaar ah. Badanaa waxay qaadataa waqti dheer ka hor inta aysan xaalad adag isku badelin. Waxa ugu muhiimsan waa in ilmaha ay ku hareeraysan yihiin dad waaweyn oo amaan iyo kalsooni siinaya inta lagu jiro mudadaas.

Waxaan ognahay in waalidiin ku wada nool hal qoys mararka qaar ay hal xaalad si kala duwan u arkaan. Waa wax caadi ah in qofku is weydiiyo sida welwelku u daran yahay isla markaana uu rajaynayo in arrintu iskeed u dhamaan doonto. “Runtii ma sidaas ayay u daran tahay?” “Way iska dhamaan doontaa.” Qoysaska qaarkood ma helaan mar walba ruux lala wadaagi karo welwelka. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in qof weyn oo kale oo ka agdhow ilmaha uu ku yeesho saameeyn keeni karta su,aalo. Si kastaba ha ahaatee, xaalada aad ku sugantahay ee hubinti la,aanta ah kaligaa kuma tihid.

Si aad u yeelato awood, waa muhiim in adiguna aad hesho taageero. Waxaa laga yaabaa inuu jiro qof qoyskaaga ka tirsan sida saaxiibo ama ruux xiriir la leh ilmahaaga inaad la hadli karto. Waxa kale oo jira xirfadlayaal ku caawinayo iyo kooxo loogu talagalay taageerida ehelka iyo waalidiinta, kuwaas oo noqon kara kaalmo muhiim ah.

## NACAYBKA, XADGUDUBKA IYO XAGJIRNIMADA EE NOLOL MAALMEEDKA ILMAHA

**Xagjirnim**o waxa ay ka dhigan tahay in qof ama koox ay aaminsanyihiin fikrado aad uga fog kuwa laga aqballo bulshoyinka dimuqraadiga ah. Badanaa waxay ku saabsan tahay diidmada qiyamka dimuqraadiyada, sida sinaanta dadka iyo xoriyada hadalka. Noocyada kala duwan ee xagjirnimada waxa ay ka simanyihiin in inta badan sawir khaldan ka bixiyaan dunida - iyadoo abuuraya cadaawad isla markaana faafinaya aragti ah i xadgudubku yahay xalka kaliya.

**Dhiiragliye Xagjirnim**o:- waxay ka dhigan tahay in qofku dhiirageliyo hanjabaada, nacaybka iyo xadgudubka si uu u saameeyo dadka kale looguna abuurto isbedel bulshada dhexdeeda.

Caruurta waxay siyaabo kala duwan ula kulmi karaan fariimo xagjirnimada ah iyo dadka xagjirnimada faafinaya. Tusaale ahaan, waxay fariimahaas kula kulmi karaan marka carruurta ciyaarayaan gameka internetka ama marka ay isticmaalayaan baraha bulshada. Waxa kale oo ay ka dhici kartaa iskuulaadka ama saaxiibada.

Waxa sida weyn loo hadal hayo xiliyadan danbe waa soo jiidashada xadgudubyada lagu baahiyo baraha bulshada oo sii badanaya, taas oo ay caruurta iyo dhlainyarada ay ka daawadaan

internetka. Tani waxay albaabada u furi kartaa dad kale oo isugu jira kuwa dhiiragaliya xadgudubyada iyo kooxaha caadeystay kuna dhiirada xadgudubyada.

Waayadan danbe wey ka adag tahay sidii hore in waalidiinta iyo dadka kale ee waaweyn ay la socdaan sida ay baraha bulshada carruurta iyo dhalinyaradu iskula xiriiraan oogana helaan dhiirigelinta. Way ku adag tahay caruurta iyo dadka waaweynba inay ogaadaan waxa runta ah ee internetka lagu baahiyo, isla markaana kooxaha xagjirka ahi ku faafiyaan fariimahooda. Isbedelka horumarineed ee cusub ayaa sababay qaab nololeedka baraha bulsahda ee ay ilmaha ku kulmayaana maanta. Si fudud ayaa baraha bulshada looga dhex heli karaa kooxaha dhiragliya xadgudubyada, waxayna si firfircoon ula xiriiraan una raadiyaan dhalinyarada bartooda internetka. Badanaa iyagoo ku soo jiidanaya dareen bulsho iyo wadajir ay dhalinyaro badani hamuun u qabaan.

Xagjirnimada waxaa lagu faafiya qaabab kala duwan sida internetka, baraha bulshada, golayaasha wadahalga, doodaha, muuqaalada iyo ciyaaraha gameka. Carruurta iyo dhalinyaradu waxay la kulmi karaan fariimo xagjir ah iyaga oo aan xitaa si toos ah iyagu u raadsanin – tusaale ahaan sida Algorithmiga oo soo gudbinayo waxyaabo noocaas ah, ama qof si toos ah ula soo xiriiro caruurta iyo dhalinyarada.

Ka waalid ahaan uma baahnid inaad ogaato wax walba oo ka dhacaya internetka. Laakiin inaad ilmaahaga tusto inaad xiiseynayso waxa uu internetka ka dhex sameeynayo iyo waxa uu ka fikirayo waxay kaa caawin kartaa inaad wax ka fahanto internetka. Waxaad si xiise leh uga weydiin kartaa ciyaaraha gameka uu ciyaaro ilmahaagu. Sidee ayay ciyaartan u shaqeysaa? Yaad la ciyaartaa IWM?

Wax badan oo ku saabsan aalada dhijitalka waxaad ka akhrisan kartaa [digitala trygghetsvärddar](#) oo ah hindise ay ururka **Rädda Barnen** iyo **Länsförsäkringar** si wadajir ah si aalada ciyaaraha/gameka internetka ee dijitaalka u noqoto goob badqab ah oo lagu kalsoonaan karo.



Akhris dheeraad ah oo ku saabsan waxa carruurta kala kulmaan internetka waxaad ka heli kartaa daraasada **Sverok** ee la yiraahdo “**Extremister i gamingvärlden**”.



## DHISIDA XIRIIRKA IYO SIDA LOO WAJAHO ILMAHA

Inaad ka welwesho ilmahaaga waa calaamad muujinaysa firfircooni. Ka waalid ahaan uma baahnid inaad jawaab u hayso su,aal walba. Muhiimadu waa inaad garab taagantahay ilmahaaga. inaad dhagaysato, ood garab taagantahay isla markaana aad u muujiso inaad danaynayso iyo daryeelkaaga ayaa waxay ka dhigantahay inaad ilmahaaga siisay kalsooni.

Caruurta waxay u baahan yihiin garab istaaga dadka waaweyn oo si degan u dhegaysta oo aan xukun ku ridin, isla markaana kula dhaqma ixtiraam iyo naxariis. Mana fududa in markasta sidaa la sameeyo, gaar ahaan hadii ilmahaagu kuu muujiyo fikrado ku cabsi geliya ama kaa careysiiya.

*Wadahadalada qaarkood ma fududa, laakiin waa muhiim in la wada hadlo oo aan laga baaqsan.*



Waa iska caadi in dadka waaweyn ay wewelaan marka ay arkaan ilmaha oo xiiseynaya ka qeybgalka kooxaha xadgudubyada sameeyo iyo fikradahooda. Isla markaa dadka waaweyn waxay sameeyaan falcelis xoogan waxayna ka fogaadaan aragtida ilmaha. Khatarta ka dhalan karta waa in ilmaha dareemo in laga shakiyay lana weeraro isla markaana loo arko ilmo aan wax fahmaynin.

Marka ugu horeysa ee ilmuhu galo xaalad cusub, ha noqoto hiwaayad cusub ama koox xagjir ah oo taageerta xadgudubyada, waxaa ilmaha ku dhici kara dareen xoogan oo soo jiidasho leh. Waa wax caadi ah in ilmuhu u arko xaaladaas wax wanaagsan oo macno leh, taas oo ka dhigaysa inay adkaato in ilmaha wax laga tuso dhinaca kale. Sidaa daraadeed, hadii wada hadalka lala yeelanayo ilmaha uu diirada saaro oo keliya waxyaabaha taban/dhaliisha, waxaa adkaan kartaa in la gaaro natiijo ama la fahmo ilmaha. Mararka qaarna waxay keeni kartaa saameyn lid ku ah ilmaha. Tani waxay sababi kartaa in ilmuhu sii jaleeco dhanka kooxda cusub, isla markaana uu sii difaaco oo xoojiyo aragtidiisa.

Isku day inaad u muujiso ilmaha inaad xiiseynayso inaad fahamto, xitaa hadii ay kugu adagtahay. Ku dhiiro inaad fiiriso ilmaha oo aad wax ka weydiiso dhinacyada wanaagsan. Sida. Maxay xaaladan cusub kuu soo kordhinaysaa? Sidee dareemaysaa? Sidee ayaad u aragtaa la joogida saaxiibada cusub?

*Marka aad wanaajiso xiriirka kaala dhexeeyo ilmaahaga ee aad abuurto kalsooni, ayay u fududaanaysaa inaad sidoo kale xuduudo u dejiso ilmahaaga, ood weydiiso su'aalo oo aad ka hadasho arrimaha adag. Xiriir wanaagsan ayaa suuragaliya in loo muujiyo ilmaha naxariis isla markaana la xakameeyo oo la hago.*



Ogsoonow inaysan khasab ahayn in wada hadaladiinu ay noqdaan kuwa dhameystiran. Waxa ugu muhiimsan waa in lawada hadlo. Adigoo dhegaysanaya, weydiinaya su'aalo ku haboon ilmaha, muujinayana xiise iyo danayn. Waxaad markaas abuureysaa kalsooni, waxaadna tusaysaa ilmahaaga inuu kuula imaan karo arin kasta oo lasoo gudbaanaado.

**Waa kuwan qaar ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah in la xasuusnaado:**

- Dooro waqti ku haboon – marka aad degan tahay oo aad wakhti haysato.
- Noqo qof xiiseynaya – weydii su'aalo furan oo dhageyso adigoo hadalka ka dhex gelin.
- Muuji inaad garab taagan tahay – mararka qaar wada hadalku wuu gaaban karaa am dheeraan karaa.
- Ku soo gunaanad si wanaagsan – Ruuxa weyn ayaa masuul ka ah in wada hadalku ku dhamaado si amniyoo kalsooni ah.

Waa muhiim inaad sii wado muujinta xiisaha ama aad isla sameysaan wax farxad leh si wadajir ah, xitaa hadii xaaladu wali adag tahay. Waa wakhtiyadaas oo kale marka ilmuhu u baahan yahay xaqiijin ah in xiriirkiinu wali jiro oo aanu lumin. Ma ahan inaad wax walba xaliso, balse waa inaad muujiso Cadcadaan iyo kalsoni wadajira, isla markaana aad garab taagnaato ilmahaaga.

*Inaad dhisto xiriir – uma baahna inaad noqoto khabiiri. ag joogitaankaaga iyo garab istaagaada ayaa wax badan ka taraya!*



Xiriirka adag kuma dhismo hal wada hadal oo keliya, wuxuu ku dhismaa la joogitaan/garab istaag, dhegaysi iyo daryeel soo noqnoqda. U muujinta rabitaanka fahamka waa agab/qalab muhiim ah. Inaad ilmaha weydiiso su'aalo oo u muujiso inaad danaynayso, waxeey dhiseysaa kalsooni, xitaa hadii aadan helin jawaabaha su,aalaha. Waa iska caadi inaad mar walba garanayn waxa aad oranayso. Waxa ugu muhiimsan waa inaad qusan.

Xitaa ayadoo mararka qaar ay kugu adag tahay inaad ku dhiirato inaad sii wado hadalka, hadana mar kasta oo aad muujiso dulqaad, sabir, aadna su'aal weydiiso ama aad si fudud u garab joogto ilmahaaga, waxaad saldhig u abuuraysaa xiriir kalsooni ku dhisan.





## **WAXYAABAHA XOOJIYA ILMAHA**

Marka ilmaha muujiyaan nacayb, waa calaamad muujinaysa in wax ka khaldanyahay noloshooda. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira waxyaabo ka caawiya carruurta inay caafimaad qabaan oo la tacaalaan dhibaatooyinka maalinlaha ah. Waxyaabahaas waxaa ka mid noqon kara xiriiir wanaagsan, dareen ka qaybgal iyo taageerada dadka waaweyn, Jimicsi, cunto wanaagsan, hurdo ku filan iyo wakhti nasasho. Waxa kale oo ay noqon kartaa hiwaayad ama howl ilmaha u arko mid xiiso iyo macno u leh. Waxa ugu muhiimsan waa in ilmuhu isagu jecel yahay oo uu ka helayo dareen wanaagsan waxa uu sameeynayo.

Marka ilmuhu haystaan waxyaabahaas lasoo xusey, badanaa way u fududaanaysaa inay koraan, horumar sameeyaan oo ay la tacaalaan waxyaabaha adag.

Ka waalid ahaan wax badan ayaad u sameeysaa ilmahaaga sida agjoogistaada iyo caawimaadaada sidii ay u heli lahaayeen kalsooni iyo farxadooda maalinlaha ah. Tusaalooyinka hoose waa qaar kamid ah waxyaabaha xoojiyo dareenka ilmaha ee muhiimka u ah iyaga.

## **Adiga ayaa isbedelka sameynaya!**

Wada hadalada ku saabsan arrimaha adag way fududaadaan badanaa hadii uu jiro xiriir wanaagsan. Haddii marar badan isku dhacdaan, waxaa idin caawin kara inaad xoojisaan xiriirkiina. Waqti fiican wada qaata oo sameeya wax farxad leh, kana yara naso waxyaabaha xiligaas culayska kugu hayo. Haddii ay adag tahay in la wada hadlo isla xiligaas isku dhacu jiro, waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn karto oo muhiim u ah ilmahaaga. Sida inaad ku dhiiragaliso waxyaabaha uu ilmahaagu jecel yahay ee ku dareemo wanaag, sida hiwaayadaha ama waqti la qaadashada saaxiibada. Inaad u muujiso inaad ku faraxsantahay waxqabadkooda, sida marka ilmahaagu kaa caawiyo guriga. Taas wax weyn ayay soo kordhinaysaa.

*Xooji waxyaabaha wanaagsan ee shaqeynaya! Waa muhiim in la dareemo qadarin iyo mahadnaq.*



Waa muhiim inaad tusto inaad qadarinayso waqtiga aad la qaadato ilmaha: sida inaad dhahdo “Aad bay u fiicneyd inaan filim wada daawano.” Inteenaa badan waxaan si sahlan u aragnaa waxyaabaha aan shaqeynayn halkii aan ka arki laheen waxyaabaha wanaagsan een ku qanacsan nahay. Waa suurtagal inay arintan adiga xitaa ku khusayso. Haddii ilmahaagu uusan rabin inuu hadlo, isku day waqti kale. Ka fogow inaad u hanjabto ama ciqaabto ilmaha marka ay wax kuu sheegaan. Taasi waxay sababi kartaa in ilmuhu ka cabsado inuu dadka waaweyn la wadaago ama kala hadlo caqabadaha iyo xaaladaha dhibka leh ee uu kulmo.

## **Xiriirka dadka ku hareereysan/xeeran ilmahaaga**

In ilmuhu ku barbaaro deegaan xasiloon waxay saameyn weyn ku leedahay darenkiisa caafimaad. Xasiloonida waxaa la abuurin karaa marka ilmuhu ku hareeresanyihiin dad waaweyn oo uu indha buuxinayo, dhegaystana oo taageera. Marka ilmuhu heysto taageero ruux weyn oo xiriir wanaagsan kala dhaxeeyo, waxay ka caawin kartaa in ilmuhu dareemo kalsooni xoojinaysa isku kalsoonaantiisa. Xitaa dadka kale ee aan waalidka u ahayn waa u muhiim nololsha ilmaha, gaar ahaan xilliyada ay waalidku ku adagtahay xaalada.

## **Doorka muhiimka ah ee Iskuulka**

In ilmuhu wanaag kala kulmo iskuulka saameyn weyn ayay ku leedahay darenkiisa caafimaad. Marka ilmuhu ku faraxsanyahay iskuulka, loolana dhaqmo si ixtiraam leh uuna helo fursad uu ku guuleysto, iskuulka wuxu siinayaa kalsooni iyo taageero nolol maalmeedka. Sida iskuulku ubaro xoojinta hab-dhaqan wanaagsan ee dadka loola dhaqmo iyo xalinta dhibaatooyinka ayaa sidoo kale door weyn ka ciyaara farxada iyo horumarka ilmaha.

## **Hawlaha iyo hiwaayadaha wakhtiga firaaqada**

Haddii ilmahaagu yeesho rabitaano xoogan oo welwel abuuri kara, sida xadgudub ama hub, waxaa ku caawin karta inaad ku dhiirageliso waxyaabaha kale ee wanaagsan ee ilmuhu jecel yahay. Inaad isku daydo inaad toos uga joojiso waxyaabahaas waxaa ka wanaagsan mararka qaar inaad ku soo biiriso ilmaha wax cusub oo uu jecelyahay. Waa muhiim in hawlaha wakhtiga firaaqadu ka qabsoomaan goob amaan ah oo ay joogaan dad waaweyn oo masuul ah. Ka waalid ahaan, waad saameyn kartaa adigoo ka qayb qaadanaya howlaha inta aad awoodo, tusaale ahaan inaad u raacdo ilmaha tartamada ciyaaraha, inaad ka wareysato sida ciyaartu ahayd ama aad geeeyso goobaha hawlaha lagu qabto.

Hawlaha wakhtiga firaaqadu waxay ilmaha ka caawiyaan inay yeeshaan nidaam wanaagsan, dareen bulsho, isku kalsooni iyo fursad ay ku horumaraan.

## **Ka qaybgalka ilmahaaga**

Badanaa ilmuhu wanaag ayay dareemaan marka loo ogolaado inay ka qayb qaataan arimaha quseeya nolol maalmeedkooda. Sida in la dhegaysto, loo oggolaado inay fikir kooda dhiibtaan, oo si dhab ah loo tixgeliyo. Markaad fahamto rabitaanka iyo waayo-aragnimada ilmahaaga ee iskuulka, goobta firaaqada iyo gurigaba, way fududaanaysaa inaad ogaato waxa muhiimka u ah ilmaha. Marka ilmuhu helo fursad uu fikradihiisa iyo talooyinkiisa ku dhiibto, waxay xoojinaysaa xiriirka idinka dhexeeya iyo dareenka uu ilmuhu leeyahay ee ka qaybgalka iyo saamaynta.

*Ilaalinta iyo taageerida ilmaha waxaa ka dhalan kara wanaag badan. Xiriir wanaagsan oo u dhexeeya waalidka iyo ilmaha wuxuu gacan ka geysan karaa caafimaad qab, waxbarasho fiican iyo awood dheeraad ah oo ilmuhu ku maareeyo dareenkiisa.*



## **Xusuusnow!**

- **Uma baahnid inaad wax walba "saxdo", goobjoog u ahow ilmaha.** Ilmahu uma baahna qof weyn oo aan khalad galin, Wuxuu u baahan yahay qof daneeya. Inaad tusto inaad fahanto oo aad garab taagantahay ayaa waxbadan kaga filnaan karta. Xitaa hadi aadan jawaab uhaynin.
- **Wada hadalada yaryar ayaa ka fiican aamusnaanta.** Looma baahna inaad sugto "waqtiga ku haboon". Su'aalo yar yar, sida xiliga jiiifka, gaadhiga dhexdiisa ama wada fadhi gaaban ayaa wax badan furi kara.
- **Ku dhiiro inaad su'aalo waydiiso, dhegaysigaaga ha ka bato hadalkaaga.** Noqo qof xiiseeynaya adigoo cadaadis saarayn. Su,aalo furan iyo dhagaysi xasiloon waxay muujiyaan danayn, xitaa hadii jawaabtu gaabantahay ama lagu jawaabin.
- **U xaqiiji dareenka ilmahaaga, xitaa haddii aadan ku raacsanayn fikirkiisa.** Waa muhiim inuu dareemo in dareenkiisa la fahmayo oo la ixtiraamayo, aysan halis ahayn. Aqbal dareenka iyo fahamkiisa xitaa hadii aad si kale wax u aragto.
- **Is xusuusi. Inaad wax muhiim ah sameeynayso, dadaalayso, natiijana keenayso.** Waa geesinimo inaad ku dhiirato fahamka iyo garab istaagga ilmahaaga xiliyada wadahaladu adagyihiin. Dadaal kasta waxuu dhisaysaa xiriir wanaagsan.

## Ma doonaysaa inaad ogaato wax dheeraad ah?

Talo-bixiyaha/Hagahayaga la yiraahdo “*Växa upp utan hat – att samtala med barn och unga om extremism*” waxaad ka heli kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mowduucan.

Sawir koodhka (scan) si aad u gasho hagaha.



## MA U BAAHANTAHAY INAAD HESHO CAAWIMAAD?

**Exit** oo ka tirsan Fryshuset, ayaa siinaya caawimaad lacag la,aan ah ehelka dadka looga welwelsanyahay xagjirnimada iyo xadgudubyada. Ruuxa la xiriiraya magaciisa wuu qarin karaa. Exit way caawisaa xitaa dadka doonaya inay ka baxaan kooxaha sameeya xadgudubyada.

**Agera Värmland** waxay talo iyo taageero bilaash ah siisaa ehelada iyo dadka doonaya inay ka baxaan xagjirnimada ama dadka khatarka ugu jiro inay ku lug yeeshaan xagjirnimada rabshadaysan.

Aalada lagu barto wadahal ka ee ay leedahay hay,ada Rädde Barn, waxaa lagu baran sida loo sameeyo wadahal ruux dhalinyar oo macmal ah oo muujinayo aragtiyo nacayb iyo xagjirnimada ah. Waxaa helaysaa talo-bixin iyo taagero uu kusiinayo talo-bixiye isla aalada ah.

Sawir koodhka (scan) si aad u gasho tababarka wada hadalka.



## XIGASHO

**Ali, M. B., & Hassan, A. S. R. B. (2023, February 14).** Deterring online radicalisation: Strengthening the family institution (CO23024). S. Rajaratnam School of International Studies. <https://www.rsis.edu.sg/rsis-publication/rsis/deterring-online-radicalisation-strengthening-the-family-institution/>

**Ellefsen, R., & Sandberg, S. (2024).** Everyday prevention of radicalization: The impacts of family, peer, and police intervention. *Studies in Conflict & Terrorism*, 47(10), 1342–1365. <https://doi.org/10.1080/1057610X.2022.2037185>

**Koehler, D. (2015a).** Family Counselling, De-radicalization and Counter Terrorism: The Danish and German programs in context. I Zieger, S. & Aly, A. (red).(2015). *Countering Violent Extremism: Developing Evidence-base for policy and practice*. Hedayah & Curtin University.

**Lösel, F., King, S., Bender, D., & Jugl, I. (2018).** Protective factors against extremism and violent radicalization: A systematic review of research. *International Journal of Developmental Science*, 12(1–2), 89–102.

**Sarour, E. O., & El Keshky, M. E. S. (2022).** Understanding extremist ideas: The mediating role of psychological well-being in the relationship between family functioning and extremism. *Children and Youth Services Review*, 136, 106420. <https://doi.org/10.1016/j.childyouth.2022.106420>

**Sikkens, E., van San, M., Sieckelinck, S. & de Winter, M. (2017).** Parental Influence on Radicalization and De-radicalization according to the Lived Experiences of Former Extremists and their Families. *Journal for Deradicalization*. Fall 2017, Nr.12, 192-226.

**Sikkens, E., Sieckelinck, S., van San, M., & de Winter, M. (2017).** Parental reaction towards radicalization in young people. *Child and Family Social Work* 2017, 22, s. 1044-1053

**Sikkens, E., van San, M., Sieckelinck, S. & de Winter, M. (2018).** Parents' Perspectives on Radicalization: A Qualitative Study. *Journal of Child and Family Studies* (2018).

**Sivenbring, J. (2018).** Utslag av oro. Göteborgs universitet: Segerstedt institutet. [1694895 ut-slag-av-oro-sivenbring2.pdf](https://www.segerstedtinstitutet.se/utslag-av-oro-sivenbring2.pdf)

**Spalek, B. (2016).** Radicalisation, de-radicalisation and counter-radicalisation in relation to families: Key challenges for research, policy and practice. *Security Journal*, Vol 29, 39-52

**Sporer, K., & Buxton, B. (2024).** The role of family members in the prevention of violent extremism and terrorism: A scoping review of the literature. *Aggression and Violent Behavior*, 78, Article 101990. <https://doi.org/10.1016/j.avb.2024.101990>





***Welweka oo laga wada hadlo – Waa barnaamij ah hagaha waalidiinta ee sida loola dhaqmo ilmaha muujinaya nacayb iyo fikrado xagjir ah*** waa qayb ka mid ah *Navigera hat* – oo ah qalab loogu talagalay degmooyinka si ay uga hortagaan, uga jawaabaan una taageeraan xuquuqda ilmaha ee ah inay ku koraan nolol ka fog nacaybka.

Mashruuca *Navigera hat* waxaa ku jira qalab xoojinaya xuquuqda dimuqraadiyadeed ee carruurta iyo dhalinyarada, wanaajinaya sida loola dhaqmo iyo wada hadalka lala yeesho carruurta iyo dhalinyarada muujinaya fikrado xagjir ah, isla markaana abuura fursado lagu ilaalinayo caruurta saameynta iyo cawaaqibta xagjirnimada.

Mashruuca *Navigera Hat* waxaa maalgaliya xafiiska **Allmänna Arvsfonden**.

